

Wargelinta waalidka.

CODSIGA FASALKA MUUSIKADA, Waalidka ardayda sannadka 2aad.

Wax ku barashada fasalka muusikada waxaa loogu talaggalay ardayda xiisaynaysa muusikada islamarkaasna ku fiican barashada muusikada. Waxbarashada fasalka muusikadu waxay ka billaabataa fasalka saddexaad waxayna socotaa illaa iyo inta lagu jiro waxbarashada aasaasiga ah, xittaa haddii uu mararka qaar dugsigu isbeddelo. Waxbarashadu waxay dugsiga isku jirka ah ka sii socotaa inta lagu jiro waxbarashada aasaasiga ah oo dhan. Wax ku barashada fasalka muusikadu waa mid faa'iido leh, waxayna u baahan tahay adkaysi iyo dhabar-adayg.

Saacadaha ama xiisadaha maaddooyinka la dooran karo waxay fasallada muusikadu ku jiheeyaan barashada muusikada.

Haddii dugsiga ardaygu u beddelmo fasalka muusikada dartiis, waalidka ayaa inta badan mas'uul ka ah kharashaadka laga yaabo in uu ka dhasho safarka dugsiga. Si kastaba ha ahaatee ardaygu wuxuu xaq u leeyahay kaarka safarka dugsileyda ee lacag la'aanta ah, haddii maasafada dugsigu ee dugsiga xaafaddiisa iyo dugsiga loo beddelay fasalka muusikada dartiis ay ka badan tahay 5 km.

Waxbarashada fasalka muusikada ee Vantaa waxaa laga helaa sideed dugsii.

Tikkurila-Hakunila

- Dugsiga Lehtikuusi 3.–9.
- Dugsiga Peltola 7.–9.
- Dugsiga Simonkallio 3.–6.

Korso-Koivukylä

- Dugsiga Mikkola 3.–9.

Myyrmäki

- Dugsiga Hämeenkylä 3.–9.
- Dugsiga Martinlaakso 3.–9.

Kivistö-Aviapolis

- Dugsiga Aurinkokivi 3.–9.
- Dugsiga Ylästö 3.–9.

FASALKA MUSIIKADA WAXAA LAGU CODSADAA WILMADA

Fasalka muusikada waxaa lagu codsadaa ka qaybgalka imtixaanka hibada muusikada. Imtixaan ayaa laga qaadayaa dhammaan dadka soo codsada. Waxaa imtixaanka la iska diiwaangelinayaa iyadoo Wilmada la isticmaalayo ugu dambeyn 20.11.-8.12.2023, saacadda 16. Foomka isdiiwaangelinta waxaa laga helaa Wilmada, Qaybta Codsiyada iyo go'aannada -hoostooda, barta Samee codsi cusub > Iska diiwaangelinta imtixaanka fasalka muusikada.

Waxaa kale oo foomka codsiga laga daabacan karaa cinwaanka <https://www.vantaa.fi/musiikkiluokat> kaddibna waxaa loo diri karaa dugsiga booska waxbarashada laga codsanayo.

Maamulayaasha dugsiyada fasallada muusikada ayaa gaaraya go'aannada lagu qaadanayo ardayda fasallada muusikada ugu dambeyn 9.2.2024. Go'aanka waxaa lagu baahinayaa Wilmada ardayda.

Ma doonaysaa in aad soo indha-indhayso waxqabadka fasalka muusikada?

Waaldiinta iyo ardaydaba waxaa lagu soo dhoweynayaa soo indha-indhaynta waxqabadka fasalla muusikada. Waxaa wanaagsan in wakhtiga soo indha-indhaynta lagala heshiiyo maamulaha dugsiga fasalka muusikada iyo macallinka fasalka muusikada, kuwaas oo sidoo kale laga helayo macluumaad dheeraad ah.

CODSO ARDAYNIMADA MACHADKA MUUSIKADA EE VANTAA

VMO (Machadka muusikada ee Vantaa) waa machad ay magaalada Vantaa maamusho, kaas oo bixiya waxbarasho tayo leh oo ay bixinayaan macallimiin xirfadlayaal ah. Waxbarashada waxaa qayb ka ah waxbarasho shakhsiga u gaar ah, garaacista muusikada oo guud iyo maaddooyinka fahamka muusikada. Waxbarashada waxaa lagu bixiyaa qolalka machadka muusikada ama dugsiga ardayga. Waxbarashadu waa lacag.

Dhammaan ardayda Vantaa ee hammiga u leh fasalka muusiga waxay si gaar ah u codsan karaan foomka codsiga sidoo kale si aad arday uga noqoto Machadka muusikada ee Vantaa. Boos arday ayaa la dalbanayaa 1-30 Abriil 2024 iyo vmo.eepos.fi. Waxaan ku dadaaleynaa inaan siino boos arday dhammaan codsadaayaasha.

Hel qalabkaada muusikada!

Marka lagu jiro munaasabadda Soiva Talo ee bisha Abriil ayeey macallimiintu kugu hagayaan tijaabinta qalab muusik oo kala duwan iyo doorashada qalabka muusikada. Macluumaadka goobta iyo jadwalku waxay ku jiraan www.vmo.fi